# Ka Caawinta Ilmahaaga Codsiga Gargaarka Dhaqaale: FAFSA

Helping Your Child Apply for Financial Aid: The FAFSA

## Waa maxay gargaarka dhaqaale ee ardaygu?

Sannad walba dowlada dhexe waxa ay siisaa malyuumaad doolar oo gargaar dhaqaale ah ardayda. Gargaarkani waxa uu noqon karaa deeq, amaah, ama shaqo-waxbarasho ah.

- **Deeqdu** waa lacag aan lagaa rabin inaad dib u bixiso.
- **Amaahdu** waa lacag badanaa aad dib u bixinayso ka dib kolka aad qalin jabiso ama aad joojiso iskuul dhigashada. Waxaa jira qaar ka mid ah amaahda oo ay khasab tahay inaad bil walba dib u bixiso inta aad wali iskuulka ku jirto.
- **Shaqada-waxbarashada** ahi waa barnaamij maalgeliya shaqo ardayda qabato oo ay ansaxiso jaamacada ay dhigtaan.



Gobolada intooda badan iyo jaamacadu sidoo kale waxa ay leeyihiin barnaamijyo gargaar si loo caawiyo si kolkaa ay ardaydu u awoodaan inay dhameeyaan jaamacad. Si aad u hesho gargaar dhaqaale waa khasab inaad buuxisato “Codsi Lacag La’aan ah Gargaarka Dhaqaale ee Dowlada dhexe” (FAFSA). Codsigani waxaa uu waydiistaa dadka akhbaarta dakhliga ee waalidka (oo ay ku jiraan waalidka hooyada ama aabaha ay is qabaan) iyo ardayga.

Codsiga (FAFSA) waxaa laga heli karaa shabakada https://studentaid.gov/h/apply-for-aid/fafsa. Waxa aad ka buuxin kartaa khadka (online) ka ama waxa aad daabici kartaa nuqul ka dinba boostada ku soo diri kartaa. Hadii aad u baahan tahay in foom banaan laguu soo diro wac 1-800-4-FED-AID (1-800-433-3243). Hadii aadan dhagaha si fiican wax uga maqal, la xiriir khadka (TTY) ee ah 1-800-730-8913.

**OGOW:** Codsiga (FAFSA) waa lacag la’aan in la buuxiyaa. Ka taxadar shabakadaha (website) ku baaqa buuxinta codsiyada (FAFSA) lacagtana ku soo dalaca dadka. Inta badan waa rugo (.com) ah. Hubi in ciwaanka shabakadu (web) uu yahay midka saxda ah!

## Ciddee heli karta gargaarka ardayga ee dowlada dhexe?

Si uu u helo Gargaarka Ardayga ee Dowlada Dhexe, ardaygu waa inuu ka soo baxaa shuruudo cayiman. Badanaa, ardaygu waa khasab inuu:

- Ahaado muwaadin wadanka U.S. ama cid aan muwaadin ahayn oo xaq u leh

- Hayso lambar sooshal sakuurati ah oo sax ah (Social Security)

- Ka diiwaan gashan yahay hay'ada Qafaalka Ciidanka diiwaan gelisa (Selective Service) hadii uu lab yahay da'diisuna u dhaxeeyso 18-25 sanno. Gal www.sss.gov si aad uga hesho akhbaar kale oo dheeri ah.

- Hayso shahaado dugsi sare ama (GED) uu ku gudbay imtixaan ay ansaxisay Wasaarada Waxbarashadu (Department of Education)

- Uu ka qoran yahay ama loo aqbalay is qorid asagoo ah arday caadi ah oo raba inuu ka kasbado digrii ama shahaado barnaamij iskuul ka qayb gala barnaamijyada Gargaarada Dhaqaale ee Ardayda.

Waxaa dhici karta in shuruudo kale quseeyaan. Wixii akhbaar ah ee kale, kala xiriir la taliyha ilmhagaaga dugsigiisa sare ama xafiiska gargaarka dhaqaalaha (financial aid) ee jaamacada uu ilmahaagu jeclaan inuu galo.

**OGOW:** Ardaygu waa uu waayi karaa gargaarka dhaqaalaha (financial aid) hadii lagu helo dambi ah maandooriye oo dhacay intii ay u socotay gargaarka dhaqaalahe. Hadii ilmahaaga loo xiray dambiyo la xiriira maandooriyeyaasha, hubi inaad kala hadasho qareen xaaladooda ardaynimo.

## Ilmahaygu waa uu qaan gaaray, waa maxay sababta aan qaybta ugu ahay hawshan?

Gargaarka ardayga waxaa la bixiyaa iyadoo la eegayo baahida dhaqaale. Dowlada dhexe waxa ay tiraa dhamaan ardayda oo dhan waxaa ka mas'uul ah waalidkood inta ay ka gaarayaan 24 sanno. Nidaamkan awgii, Wasaarada Waxbarashaddu (Department of Education) waxa ay u baahan tahay akhbaarta dakhliga ee waalidka ee dhamaan ardayda ka yar 24 ka sanno si kolkaa ay u go'aansato xaq u yeeladka gargaarka dhaqaale.



Waxaa jira waxyaabo ka reeban "nidaamka 24 sanno." Matalan, ardayga waxaa loo arkaa inuu madax-banaan yahay hadii:

- ardaygu uu yahay halgamaa ama hadda ka tirsan Ciidanka Qalabka sida ee U.S.

- ardaygu uu guursaday

- ardaygu uu qoys aan dhalin la noolaa ka dib kolkii u gaaray 13 jir ama labadii waalidba ay geeriyoodeen ka dib intii ilmahu uu gaaray 13 jir

- ardaygu uu ka shaqeynayo ka helida shahaado barnaamij maastar ama cilmi -sare ah

- ardaygu uu leehahay caruur ama dadka kale oo uu mas'uul ka yahay oo in ka badan bar ka hela gargaarkooda ardayga

- ardayga ay maxkamadi xukuntay inuu yahay ilmo xoroobay
- ardaygu uu hoy la'aan yahay ama u khatar u yahay hoy la'aan. Baahidan waxaa akhbaarteeda laga ogaan karaa gabaadyada dadka hoy la'aanta ah, barnaamijyada ku meelgaarka ah ama xiriiriyaha barnaamijka hoy la'aanta ee dugsiga sare.

Wixii su'aalo ah ee ku saabsan arimaha mas'uulyada kala xiriir maamulaha gargaarka dhaqaalaha.

## Ka waran hadii uusan ilmahaygu aniga ila noolayn?

FAFSA waxa ay u baahan akhbaar ku saabsan dhaqaalaha waalidka aan ka ahayn marka ilmahu uu ka soo baxo mid ka mid ah ka reebitaanada kore. Taasi waa run xataa hadii uusan ilmahu la noolayn waalidka. Hadii aad diido inaan bixiso akhbaarta, ilmahaagu ma uu heli doono gargaarada dhaqaale ee ay xaq u leeyihiin.



**OGOW:** Dadka xaquuqdoodii waalidnimada ee ilmaha la joojiyey looma tixgeliyo inay waalid ilmaha u yihiin marka ay noqoto FAFSA.

## Sidee ayaa khbaartayda shakhsiyanka ah loo isticmaali?

Akhbaarta dakhliga waxaa loo adeegsadaa in lagu ogaado inta ay le'eg tahay iyo nooca gargaarka ah ee la siinayo ardayga. Kolka aad saxiixdo foomka, waxa aad u ogolaanaysaa in dowladdu eegi karto akhbaarta aad siiso. Waxa ay ka hubiyaan oo ay eegaan canshuur-celinta.

## Sidee ayaa gargaarada dhaqaale loo bixiyaa?

Wasaarada Waxbarashaddu (Department of Education), (DOE), waxa ay eegtaa dakhliga ku qoran FAFSA ka dibna waxay sameysaa Warbixinta Gargaarka Ardayga (Student Aid Report) ee la yiraa (SAR). (SAR) waxa ay sharaxdaa inta ay tahay lacagta hay'ada (DOE) ay u malaynayso in ardayga iyo qoysku ay awoodaan inay ku bixiyaan kharashka iskuulka. Cadadkan waxaa la yiraa Qiyaasta Gacan ka gaysiga Qoyska (EFC). Jaamacad iyo kuleej walbaa waxa u adeegsadaa (EFC) si uu u go'aansado inta ay tahay gargaarka dhaqaale ee la siinayo arday walba. (EFC) kuma khasabto waalidka inay bixiyaan kaharaashka jaamacadaha.

## Hadii aan buuxisado FAFSA ma khasabaa inaan ka caawiyo ilmahayga inuu bixiyo kharashaadka iskuulka?

Maya. FAFSA waxa ay ka caawisaa jaamadaha iyo kuleejooyinka inay ogaadaan inta ay tahay gargaarka la siinayo ilmahaaga. Hadii ilmahaagu uu codsado amaahda iskuulada, bangigu waxaa dhici karta inuu u baahdo qof weyn oo la saxiixa ilmaha warqadaha amaahda ka hor inta aysan ogolaan amaahda. La saxiixida, waxa aad ku ogolaanaysaa inaad dib u bixinayso amaahda hadii ilmahaagu uu bixin waayo. Tani waa habka ka gooni ah FAFSA da. Saxiixida FAFSA uun, **ma ay** ogolaato wax amaah ama mas'uul ka noqosho dhaqaale oo magacaaga ah.



**Wixii akhaar ah ee kale ka**

- Wasaarada Waxbarashada ee U.S. ee at www.ed.gov
- Wac 1-800-4 FED AID (1-800-433-3243)
- La xiriir xafiiska gargaarka dhaqaale (financial aid) ee iskuulka ilmahaaga
- La xiriir la taliyaha tacliinta ee Dugsiga Sare

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2024 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**